

---

## **Ku Dhaqanka Nidaamka iyo Sharciyadda Gudaha:**

### Qodobka 1aad: Magaca iyo Ujeedada

1. **Magaca:** Magacu waa Dhaq-dhaqaaqa Mudnaanta Puntland.

2. **Ujeedo:** Ujeedada loo aas-aasay ururka waa horumarinta dimuqraadiyadda iyo Maamul daadejinta, Kobcinta, Sinaanta iyo Gunti-ugiijska.

Iyada oo loo marayo u hindise kartiyeed ku salaysan dhamaan qaybaha bulshada.

### Qodobka 2aad: Xubinnimadda

1. **Shuruudaha Xubinnimadda:** Kamid noqoshada Dhaqdhaqaaqa Mudnaanta Puntland waxay u furan tahay Shakhsi kasta oo taageera himiladda, qiyamka iyo ujeedooyinka Ururka.

Xubnimaddu waxay sidoo kale u furan tahay qofkasta oo kasoo jeeda ama ku abtirsada Deegaanada Puntland.

2. **Xuquuqda iyo Waajibaadka:** Qofkasta oo xubin ka ah waxaa xaq loogu leeyahay inuu ka qayb qaato habka go'aan qaadashada, ka qaybgalka shirarka iyo helitaanka uu bixiyo ururku sida; ilaha faa'iidooyinka. Sidoo kale Xubnaha waxaa laga raba inay dhawraan qiyamka iyo mabaadi'da uu u taagan yahay Ururka, waliba si ay ku jirto firfircooni iyo Hawl-Wadajireed ka qaybqaadashadda dhamaan hawla iyo hindisooyinka.

### Qodobka 3aad: Qaab-dhismeedka

1. **Maamulka Guud:** Golaha ugu sareeya Urukan sida; go'aan qaadashadda iyo go'aan ka gaarida wuxuu

---

noqonayaa Golaha Guud, oo ka kooban wakiillo ka kala oo ka socda dhamaan gobollada Puntland ee kala duwan. Gollahaan lagu dhan yahay waa in uu shiraa si uu u xilliyo, daadejinta hadafka, siyaasadaha, iyo istaraatiijiyadda kowaad ee Mudnaanta Puntland.

2. **Golaha Hoggaaminta:** Golaha Hoggaanka waxa uu ka kooban yahay dad la soo doortay iyo wakiilo ka socda cutubyada gobollada waxayna u adeegayaan si dhex-dhexaadimo ah Golaha Guud iyo heerka hoose. Golaha Hoggaanka ayaa ilaalin doona siyaasadda hirgelinta iyo isku dubaridka hawlaha guud iyo hawl maalmeedyadda.

3. **Cutubyada Gobollada:** Cutubyada gobollada waa in laga abaabulaa guud ahaan Puntland iyagoo Qurba-joogtu metelayaan degaano gaar ah ama bulshooyinkooda. Cutubkani wuxuu noqon doonaa mid u adeega heerka asaasiga ah ee Uruka, wax ka qabashada arrimaha bulshada oo isugu jirta taageerid iyo abaabul.

4. Kooxaha sida wadeenada iyo shaqaalaha Urka: Waxaa la samayn karaa ciidan-hawleed iyo kooxo-shaqaale oo ku salaysan waxyaabo gaar ah si wax looga qabto arrimo gaar ama Deg-Deg ah;

- Gudoomiyuhu waa in uu soo xulaa ugu yaraan 25% xubnaha guddi hawleed kasta iyo shaqaalaha, iyadoo la tixgelinayo khibradda iyo waayo-aragnimada, ballanqaadka iyo hadafka dhaqdhaqaaqa.
- 75% ka soo hadhay xubnaha hawl-wadeenadda iyo koox hawleedkaba waxaa soo xulaya Golaha Guud

---

iyo Hoggaanka Ururka, hubinta matalaadda iyo kala duwanaanshiyaha.

#### Qodobka 4aad: Habka Go'aan qaadashada

1. **Is- fahan ku dhisan afgarad iyo Qancin:** Ururka Mudnaanta Puntland waa in uu mudnaanta koowaad siiyaa go'aan qaadasha, iyadoo loo marayo habab suurto gal ah lana isku raacsan yahay iyo wadar ogol, lama qaadan karo go'aan ilaa waxaa lagu gaari karaa qaab cod bixin ah, qof-kasta wuxuu xaq u leeyahay hal cod.

2. **Daah-furnaanta:** Hababka go'aan-qaadashadu waa inay noqdaan kuwo hufan, oo khuseeya macluumaad ay si daah-furan u wadaagayaan xubnaha.

Waa in la rikoodh gareeyo war-murtiyeedyada kasoo baxa Shirarka Ururka iyo go'aamada dhacdo kasta, waa in la diiwaan geliyo oo la ogeysiiyaa xubnaha waqti ku habboon.

#### Qodobka 5aad: Doorashooyinka iyo Xaddidnaanta Muddada

1. **Habka doorashada:** Doorashada jagooyinka sida; hoggaaminta iyo wakiillada waa in ay u dhacdaa si ay ku jirto dimuquraadi, hufnaan iyo sinaan iyo cadaalad. Magacaabidda iyo codbixin

Nidaamyada waa in horay loo sii dejiyaa, musharxiintana waa inay helaan fursaddo isku mid ah, si ay u soo bandhigaan barnaamijyadooda xubinnimadda.

2. **Muddada uu Jagada hayn karo:** Jagadda Hoggaaminta iyo Xubnaha Golaha Guud waa in ay hoos yimaadaan Muddo kooban si loo hubiyo beddelka iyo kor

---

u qaadidda aragtiyo cusub. Waqtiga-Jagadu waa in ay ahaadaa laba (2) sano ka hor oo ay la socoto hal ikhtiyaar dib u doorasho.

#### Qodobka 6aad: Wax ka beddelka

1. **Habka Wax Ka Beddelka:** Xeer-hoosaadkan waxa lagu beddeli karaa cod aqlabiyad ah saddex meelood laba meel ee golaha guud. Waxka bedelka la soo jeediyay waa in lagu soo gudbiyaa qoraal iyo nuqul loo qaybiyey dhamaan xubnaha ugu yaraan hal (1) sitimaan ka hor codbixinta.

#### Qodobka 7aad: Sharciyadda Kala Diridda

1. **Habka kala guurka:** Haddii ay dhacdo in dhaq-dhaqaaqa kowaad ee Puntland la kala diro, hantida hadhay waa in loo qaybiyaa hal ama in ka badan oo ururo aan faa'iido doon ahayn oo la mid ah hawlgallada iyo ujeedooyinka, sida uu go'aamiyo Golaha Guud.

#### Qodobka 8aad: Korsashada

1. **Ansixinta Xeer-Hoosaadka:** Xeer-hoosaadkan waxa lagu ansixinayaa cod aqlabiyad ah saddex meelood laba meel Golaha Guud wuxuuna dhaqan galayaa isla marka go'aan la saxiixo.